

## Wax kasta oo aad u baahan tahay inad ka ogaaato tallaalka degmada Asker

**Qof kasta oo ka weyn 18 sano kuna nool deganaada degmada Asker, waxaa la siinaya tallaalka koronada. Haddii aad is tallaalsho waxaad iska ilaalin doonta inaad si daran ugu xanuunsato caabuqa koronada.**

Waa ikhtiyaar waana bilaash in la qaato tallaala koronada. Tallaalka waa in la qaataa laba jeer dhowr toddobaad gudahood. Degmadu waxay ku dhirrigelinaysaa inta ugo badan oo suurtogal ah inay qaataan tallaalka koronada. Tallaalka wa mid ammaan ah.

### Sida aad iskaga diiwaangelinayso tallaalka koronada:

- Gal ciiwaankan si aad ugu biirto safka tallaalka. Wuxaa diiwaangelin kartaa naftaada ama qof kale. Waa inaad haysataa barnaamijka BankID.
- Markuu safkaa tallaalka so dhowaado, waxaad heli doonta farriin SMS oo ka socota degmada, oo leh ciwaan aad galayso si aad ballan u sameysato:
  - Gal ciiwaanka aad ku heshay SMS, si aad ballaan u qabsato.
  - Isla markiina dooro labo ballaan. Si aad u hesho tallaalka qaybtiiisa koowad iyo tan labaad.
  - Waxaad heli doonta farriin xaqiijin oo SMS ah, waqtiga iyo goobta tallaalka.

### Waxaad xaq u leedahay turjubaan

Waxaad xaq u leedahay turjubaan. Turjubaanku waa lacag la'aan. Haddii aad u baahan tahay turjubaan, kala xiriir shaqaalaha tallaalka taleefanka 66 71 59 50.

### Sualo?

Ka wac taleefanka tallaalka 66 71 59 50, si aad u hesho talo iyo tusaaleyn ku saabsan tallaalka koronada. Saacadaha taleefanka furan yahay waa isniinta ilaa arbacada: 08:00 – 15:30, khamiista: 10:00-15:30 iyo jimcaha: 08:00-15:30. Waxaa sido kale ka heli kartaa macluumad ku saabsan tallaalka koronaha adoo wacaya taleefanka koronada guud 815 55 015.

### Goobaha tallaalka

- Haddii aad ka weyn tahay 75 sano ama aad ku jirto dadka halista ku yahay xanuunka, badanaa dhakhtarkaaga ayaa ku tallaala. Waxaa si toos ah kula soo xirriiri doona dhakhtarkaaga.

- Wuxaan sameynay xaruun caafimad oo tallaalka waxay ku taala Lensmannslia 4, oo u jirto masaafad yar boosteejada basaska ee degmada Asker.

## Goorme la i tallaalaya?

Degmada Asker waxay raacaysa taalada mudnaanta tallaalka ee maamulka qaranka.

Ka akhriso warbixin dheerad ah oo ku saabsan sida lo kala horreeyo iyo mudnaanta tallaalka,  
ka akhriso bogga qaranka ee Caafimaadka Dadweynaha.

**Ma rabtaa inaad wax badan ka ogaato tallaalka koronada? ka akhriso**  
**warbixin bogga qaranka ee Caafimaadka Dadweynaha.**